

NHS-kaaga

NHS

baaritaanka ilkaha



Macluumaad ku saabsan baaritaannada ilkahaaga iyo goorta ay tahay inaad mid sameyso

Wixii ah dadka qaangaarka ah ee leh ilko iyo cirid caafimaad qaba kuwaas oo khatar yar ugu jira inay ku dhacaan cudurrada ilkaha, tani waxay noqon kartaa [ilaa labadii sanaba mar](#).



Waa maxay baaritaan?

Baaritaanku waa halka xubin ka tirsan kooxda ilkaha uu eego ilkahaaga, ciridkaaga, iyo afkaaga. Waxay ka hubiyaan afkaaga oo dhan calaamadaha suuska iligga, kansarka afka iyo cudurka cirridka.

Kooxda dhakhtarka ilkaha way ka shaqayn doonaan haddii aad mustaqbalka khatar ugu jirto inaad yeelato dhibaatooyin ilko, af ama cirid.

Immisa jeer ayaa habboon inaan baaritaan isku sameeyo?

Kooxda dhakhtarka ilkaha waxay adiga ama daryeelahaaga idiin kala hadli doonaan wax ku saabsan goorta ay tahay inaad samayso baaritaankaaga xiga. Haddii aad u baahan tahay daawayn ilkeed, waxay ku ogeysiin doonaan marka lagaaga baahan yahay inaad soo noqoto Aad bay u fududahay in la daaweeyo dhibaatooyinka lagana joojiyo inay ka sii daraan haddii waqti hore la ogaado.

Wixii ah dadka qaangaarka ah ee leh ilko iyo cirid caafimaad qaba kuwaas oo khatar yar ugu jira cudurrada ilkaha, tani waxay noqon kartaa **ilaa labadii sanaba mar**.

Carruurta leh ilko iyo cirid caafimaad qaba kuwaas oo khatar aad u yar uga jiro inuu ku dhaco cudurka ilkaha waxa baaritaan lagu samayn doonaa **sannadkiiba hal mar**.

Si dhakhso leh ayaa laguugula kulmi doonaa haddii aad qabto dhibaato ilkeed ama haddii aad khatar sare ugu jirto inuu kugu dhaco cudurka ilkaha.



Yay tahay cidda sameyn doonta baaritaankayga?

Baaritaankaaga waxaa sameyn doona dhakhtar ilkeed, daaweeyaha ilkaha ama fayadhowraha. Kooxaha ilkaha ayaa go'aamiya qofka ugu fiican ee kugu samayn kara baaritaanka iyo daaweyn kasta.

Maxaa dhacaya haddii aan daaweyn u baahdo?

Waxaad u baahan kartaa inaad u soo noqoto daawayn ama inuu kula kulmo xubin kale oo kooxda ilkaha ah. Waxay kuu sharxi doonaan haddii aad u baahan tahay inaad bixiso wixii ah khidmadaha NHS ama haddii aad heli karto caawimaada kharashyada ilkaha.



Maxaa dhacaya haddii ay dhibaato igu dhacdo ka hor baaritaankayga xiga?

Haddii aad wax dhibaatooyin ah kala kulanto ilkahaaga, ciridkaaga ama afkaaga ka hor baaritaankaaga xiga, la xiriir hawlwadaha dhakhtarka ilkaha oo codso in si degdeg laguula kulmo.

Maxaa dhacaya haddii aan u baahdo inaan si degdeg ah ula kulmo dhakhtarka ilkaha?

Haddii aadan heli karin rugta dhakhtarka ilkaha, ka dib la xiriir 111 onlaynka iyadoo loo marayo www.111.nhs.uk ama wac 111.

Halkeen ka heli kara wax badan oo dheeraad ah?

Booqo boggagan mareegta NHS si aad u hesho macluumaad dheeraad ah:

adeegyada ilkaha iyo baaritaannada ayaa laga heli karaa barta www.nhs.uk/dentalservices

Macluumaad ku saabsan adeegyada ilkaha iyo baaritaannada ayaa laga heli karaa barta www.nhs.uk/teethandgums

